



STATSMINISTERENS KONTOR

War-safaaxadeed

Dawladdu waxay sii wadaysaa dib-u-furiddii bulshada

Dawladdu waxay sii wadaysaa dib-u-furiddii bulshada, waxayna u gudbaysaa heerkii saddexaad ee qorshaha dib-furidda. Waxaa hadda la oggol yahay in ay dad badan guryaha isku booqdaan, in ay dad badan qabanqaabooyinka tagaan iyo in ay yaraato baahida loo qabo in guryaha lagu shaqeeyo. Carruurta iyo dhallinyaraduna way ka qaybqaadan karaan qabanqaabooyinka isboortiga- iyo dhaqanka ee ka dhacaya gobollada iyo degmooyinka kale ayaga oo aan u baahnayn in ay 1 mitir kala fogaadaan.

Talooyinka cusub isla haddaba horay ayay ka dhaqangelayaan, meesha wax-ka-beddellada xeerarka lagu sameeyay ay dhaqangelayaan axadda 20-ka juun saacadda 1200.

– Tirada dadka cudurka qaadaya hoos ayay u socotaa, midda dadka isbataallada la dhigayo waa sii yaraanaysaa – qiyaasti bar dadka ay da’doodu ka weyn tahay 18 sanana ugu yaraan hal cirbad oo tallaah ah ayay qaateen. Qorshuhu sidii lagu talagalay ayuu Norway ku socdaa, waxaan diyaar u nahay in aan galno heerkii saddexaad ee dib-u-furidda, ayay tiri raysalwasaare Erna Solberg.

Go’aanka lagu gelayo heerka saddexaad waxaa lagu saleeyay soojeedinta Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Weli waa dhici kartaa in cudurku meel ka dillaaco oo markaa loo baahdo in lagu soo rogo xeerar meeshaas u gaar ah.

– Waa in aan weli taxaddar muujinnaa. Meelo badan oo dunida ah ayay xaaladda faafidda cudurku weli tahay mid aan la saadaalin karin, waxaa kale oo hubidla’aan abuuraya fayraska is-beddelaya. Waxaa sidaas darteed loo baahan yahay in ay weli lagu jiro heegan sare iyo xayiraado marka Norway la soo gelayo. Solberg waxay hoosta ka xarriiqday in ay dib-u-furidda Norway ku xiran tahay in aan xoogaa dib u dhigno furidda xudduudda waddanka.

Iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha

– Intii cudurkaan safmarka ah socday oo dhan waxaan mudnaanta siinaynay carruurta iyo dhallinyarada. Heerkan hadda la marayo ee dib-u-furiddana waxaa carruurta iyo dhallinyarada saaran tillaabooyin ka debeansan kuwa dadka waaweyn, ayay tiri Guri Melby oo ah wasiirka waxbarashada iyo is-dhexgalka.

Postadresse
P.B. 8001 DEP
0030 OSLO

Regjeringen.no
[Twitter](#)
[Facebook](#)
[Flickr](#)

[Kommunikasjonsseksjonen](#)
Telefon: 22 24 40 07

Besøksadresse
Glacisgata 1
OSLO

statssekretær
[Rune Alstadsæter](#)
Kontor: 22 24 48 40
Mobil: 91 55 84 19

kommunikasjonssjef
[Anne Kristin Hjukse](#)
Kontor: 22 24 40 72
Mobil: 99 21 46 10

Degmooyinku ayaga ayaa weli go'aan ka gaaraya heerka tillaabooyinka ee ay ku jirayaan xannaanooyinka carruuraha iyo iskoolladu.

– Iskoollada iyo xannaanooyinka carruuruhu waxay ku tala gelayaan in ay heer cagaaran ahaan doonaan marka fasaxu dhammaado, haddii aysan xaaladda faafidda cudurka ee degaanku sidaa si ka duwan sheegayn. Waxaan aad ugu rajo weynahay in badanka iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha dayrta la furi doono ayaga oo ku jira heer cagaaran iyo xaalad caadi ah. Jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamada laftigoodu waa in ay ku talagalaan in ay waxbarashadu goobahaas ka dhici doonto dayrta, ayay tiri Melby.

– Waxaa sidoo kale la oggolaanayaa in dad ka kala yimid gobollo iyo degmooyin kala duwan ay wax ka wada qaybqaadan karaan, oo waxaa la oggol yahay koobabka iyo tartammada ay isugu yimaadaan carruuraha ka kala yimid qaybaha kala duwan ee dalka. Laakiin ha la xasuusto in dadka waaweyn, carruurta iyo walaalaha yaryar intaba lagu darayo tirada caddadka loo oggol yahay qabanqaabooyinka ay ciyaarayaan carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano, ayay tiri wasiirka waxbarashada iyo is-dhexgalka.

Waa loo baxayaa kulannada xagaaga (sommerleir)

Carruur iyo dhallinyaro badan ayaa maanta galay fasaxii xagaaga.

– Waxaan u malaynayaa in carruur iyo dadka waaweyn ba in ay is weydiinayaan sida ay kulannada xagaagu sanadkaan noqon doonaan. Waxaan ku faraxsanahay in ay sanadkaan jiri doonaan kulannadii xagaaga, kulannada firfircoonida (aktivitetsleirer) iyo waxyaalo kale oo la qabto wakhtiga firaaqada la yahay. Taas oo micnaheedu yahay in uu jiri doono jawi kulan iyo waxyaalo ay noloshooda oo dhan xusuustaan kumanyaal carruur iyo dhallinyaro ah, ayuu yiri Kjell Ingolf Ropstad oo ah wasiirka qoyska- iyo carruurta.

In kasta oo dalka laga dhoofi karo oo dalxiis dibedda loo aadi karo, waxaa weli jiri doona xaddidaadyo iyo xeerar adag.

– Way adkaan kartaa in dibedda loo dhoofo, saf ayaana muddo dheer lagu jiri karaa marka Norway la soo gelayo. Waxay sidaas darteed dawladdu ku talinaysaa in fasaxa lagu qaato gudaha Norway. Taas ayaa ugu ammaan badan oo inta ugu badan la isku hubaa, ayuu yiri Ropstad.

Qeexid

Dadka tallaalka buuxa qaatay:

- dadka qaatay labo cirbadood oo tallaalka ah oo ay cirbaddii danbe ka soo wareegtay muddo hal toddobaad ah.

- dadka uu ku dhacay cudurka covid-19 islamarkaana qaatay hal cirbad oo tallaalka koroonaha ah taas oo lagu duray hal toddobaad ka hor. Cirbadda labaad ee tallaalka ma qaadan kartid ayadoo aysan saddex toddobaad ka soo wareegin markii lagaa qaaday tijaabada cudurka lagaaga helay.
- dadka qaatay hal cirbad oo tallaal ah oo saddex toddobaad kaddib inta tijaabo laga qaaday laga helay cudurka koroonaha. Si buuxda ayaad u tallaalan tahay marka aad ka baxdo gooni isu soocidda.

Dadka difaacan:

- tallaal buuxa ayay qaateen.
- dadka qaatay hal cirbad, oo ay ka soo wareegtay 3 ilaa 15 toddobaad markii ay cirbadda qaadeen.
- dadka uu cudurka covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay.

Waa kuwan tillaabooyinka heer qaran ee heerka 3-aad

Talooyinka waddanka oo dhan

Dadka ka fogow masaafo 1 mitir dhan. Gacmuhu nadiif ha ahaadeen. Guriga joog haddii aad xanuunsato.

Is-dhexgalka dadka

- Yaanay ku soo booqan wax ka badan 20 qof. (qodob cusub)
- Carruurta xannaanooyinka carruuraha iyo kuwa dugsiga hoose waxaa soo booqan kara kuwa ay isku kooxda joogtada ah yihiin xataa haddii ay ka badan yihiin tirada dadka ku soo booqan kara ee la iskula taliyo.
- Dadka difaacan (bogga lagu qeexay) tirada laguma darayo marka la xaddidayo inta qof ee isu imaan karta.
- Waxaa weli la iskula talinayaa in la kala fogaado, laakiin dadka difaacan intii hore way uga dhowaan karaan (in hal mitir ka yar) kuwa kale ee ayaguna difaacan – iyo kuwa aan difaacnayn laakiin aan ku jirin dadka u nugul haddii uu cudurku ku dhaco.
- Waxaa la isku boorriyaa in dibedda lagu kulmo.

Safarrada

- Safarrada waddanka gudahiisa ah waa loo bixi karaa.
- Dadka aan difaacnayn (bogga lagu qeexay) ee u safra degmooyin ay ka jiraan tillaabooyin dabacsan waa in ay raacaan talooyinka ka jira degmadii ay joogeen safarka ka hor.
- Dadka aan difaacnayn waxaa lagu boorriyaa in ay taxaddar dheeri ah muujiyaan oo safarkooda sii qorsheeyaan si ay inta ugu badan ee suurtagalka ah uga baaqsadaan in ay cudurka u kala gudbiyaan meelaha ay u kala safrayaan. Waxay weliba taasi si gaar ah muhiim ugu tahay dadka ka safraya meelo cudurku ku badan yahay, taas oo laga wado degmooyin ay ka jiraan tillaabooyin adag oo ku salaysan cutubka 5A ilaa 5C ee xeer-hoosaadka covid-19 ama xeer-hoosaad la mid ah.

Iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha

Xannaanooyinka carruuraha iyo iskoolladu waxay raacayaan heerka tillaabooyinka ee nidaamka samaanfalaha waddooyinka ee midabbada cagaarka, jaallaha iyo guduudka ayaga oo wax ku salaynaya qiimaynta degmada gaarka ah – waxayna diyaar u ahaanayaan in ay beddelaan heerka tillaabada haddii ay is beddesho xaaladda faafidda cudurku.

Waxbarashada sare

- Waxbarashada la tegayo goobaha waxbarashada ayaa la badaniyaa – iyo in laga fikiro in joogto dadka tijaabo looga qaado.
- In la diiwaangeliyo dadka jooga iyo kuraasta ay fadhiyaan si raadraaca cudurku u fududaado.

Shaqada

- In la kordhiyo tegista goobaha shaqada. (qodob cusub)
- In qayb ahaan guriga lagu shaqeeyo/ama wakhtiyo kala duwan la shaqeeyo.
- In shaqabixiyuhu in sidii hore ka badan qiimayn ugu sameeyo in loo baahan yahay in guriga lagu shaqeeyo ayada oo taas loo eegayo khatarta loogu jiro in cudurka la qaado ee degaanka ka jirta. (qodob cusub)
- Tillaabooyinka guud ee ka hortagga kala qaadista cudurrada.
- Waa in ay suurtaggal tahay in dhammaan la kala fogaan karo oo la isu jirsan karo masafo 1 mitir ah.
- Dadka difaacan goobta shaqada loogama baahna in ay dadka kale ka fogaadaan, laakiin waa in ay si gaar ah uga taxaddaraan dadka aan difaacnayn kana midka ah kuwa u nugul haddii uu cudurku ku dhaco. (qodob cusub)

Qabanqaabooyinka (kuwa gaarka ah iyo kuwa dadweynaha labadaba)

Waxaa laysku boorrinayaa in qabanqaabooyinka dibedda lagu qabto intii gudaha lagu qaban lahaa.

Dadka aan difaacnayn ee ka yimid meel cudurku ku badan yahay looma baahna in ay tagaan qabanqaabooyin ka dhacaya degmooyin kale. Meel cudurku ku badan yahay waxaa loola jeedaa degmooyin ay gudahooda ka jiraan tillaabooyin adag oo ku salaysan cutubka 5A ilaa 5C ee xeer-hoosaadka covid-19 ama xeer-hoosaad la mid ah.

Firfircoonida isboortiga-, dhaqanka iyo wakhtiga firaaqada la yahay

- Waxaa la isku boorrinayaa in firfircoonida dibedda lagu qabto intii gudaha lagu qaban lahaa.
- Taladii ahayd in masafo 1 mitir ah la kala fogaado waa la iska dhaafayaa gudaha iyo dibeddaba mararka ay taasi muhiimka u tahay fulinta firfircoonida. Ka-dhaafiddaan

ayaa dadka waaweyn u oggolaanaysa in ay ciyaari karaan ciyaaraha la is taabanayo. (qodob cusub)

- Dadka waaweyn waxaa lagu talinayaa in kooxdu ay noqoto ilaa 30 qof marka gudaha la joogo, haddii dibedda la joogana ilaa iyo 40 qof. (qodob cusub)

Kulannada iyo firfircoonida xagaaga (Sommer- og aktivitetsleir) (qodob cusub)

- Dadka ka qaybqaadanaya kulannada xagaaga, kulannada firfircoonida iyo waxyaalaha kale ee la qabto wakhtiyada firaaqada la yahay ee ay dad badan isugu yimaadaan islamarkaana socda maalmo badan, waxaa lagu talinayaa in tirada lagu xaddido ilaa iyo 300, waxaa kale oo lagu talinayaa in dadka loo sii kala qaybsho kooxo midkiiba yahay qiyaastii 40 qof.
- Dadka laga dalbi maayo in ay isu jirsadaan masaafo 1 mitir ah, laakiin talooyinka guud ee kala fogaanshaha iyo nadaafadda gacmuhu way ka jirayaan feesata, dadka waaweyn iyo carruurtana way qabanayaan.
- Talada ah in la kala fogaado waa la iska dhaafayaa marka ay feesatada ka dhacayso firfircooni aan la qaban karin ayada oo aan 1 mitir la isaga soo dhowaan.

Ciyaaraha heerka sare

Ciyaaraha heerka sare sidii caadiga ahayd ayaa loo qaban karaa. Taas oo ka dhigan in ciyaaraha is-reebreebka horyaalka lagu ciyaari karo dibedda iyo gudaha labadaba. (qodob cusub)

Xeerarka khuseeya dalka oo dhan

Goobaha ganacsiga

Waa furan yihiin ayada oo si macquul ah oo waafaqsan xeer-hoosaadka covid-19 looga hortagayo faafidda cudurka, sida in la suurtageliyo in ugu yaraan 1 mitir la kala fogaado iyo in jiraan nidaamyada wanaagsan oo nadaafadda lagu hagaajinayo. Tillaabooyinka ka hortagga faafidda cudurka, eeg nidaamyada u yaalla goobaha ganacsiga.

Bandhigyada badeecadaha iyo suuqyada ku-meelgaarka ah waxaa qabanaya xeerar la mid ah kuwa goobaha ganacsiga.

Firfircoonida isboortiga-, dhaqanka iyo wakhtiyada firaaqada la yahay

- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano ayaga oo ah kuwa fulinaya ayay ka qaybqaadan karaan qabanqaabooyinka isboortiga ama tartammada ka dhacaya gobollada/degmooyinka kale (ee gudaha waddanka), ha ka dheceen dibedda ama gudaha, ayaga oo aan looga baahnayn in ay 1 mitir kala fogaadaan. (qodob cusub)
- Dadka waaweyn ee ciyaaraya ciyaaraha guud waa laga dhaafayaa xeerka 1-ka mitir marka ay ka qaybqaadanayaan qabanqaabooyinka isboortiga sida tartammada iyo kulammada ciyaaraha ee gobolkooda/degmadooda. Dibedda iyo gudaha labadaba waa laga dhaafayaa. (qodob cusub).

- Dadka waaweyn ee qoob-ka-ciyaarayaasha ah, kuwa muustikiistaha ah iyo kuwa farshaxankooda masraxyada ku soo bandhiga laakiin aan xirfadlayaasha ahayn gudaha iyo dibedda labadaba waa laga dhaafayaa xeerka 1-ka mitir marka ay joogaan qabanqaabooyinka dhaqanka – haddii ay yihiin kuwa mararka kale isla tababbarta. (qodob cusub).

Qabanqaabooyinka

Qabanqaabooyinka gaarka ah

- Ilaa iyo 100 qof haddii la joogo goob dadweyne ama gole la kireystay/amaahday, gudaha iyo dibeddaba (qodob cusub)

Qabanqaabooyinka dadweynaha (qodob cusub)

Tijaabo ama shahaado koroone la'aan	Gudaha	Dibedda
Goobo joogto ah oo la isu tilmaamay	Ilaa iyo 1000 qof (500 x 2 kooxood oo joogto ah)	Ilaa iyo 2000 qof (500 x 4 kooxood oo joogto ah)
Goobo joogto ah la'aan	Ilaa iyo 400 qof (200 x 2 kooxood oo joogto ah)	Ilaa iyo 800 qof (200 x 4 kooxood oo joogto ah)
La haysto tijaabo ama shahaado koroone		
Goobo joogto ah oo la isu tilmaamay	50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 2500 oo qof (500 x 5 kooxood oo joogto ah)	50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 5000 oo qof (500 x 10 kooxood oo joogto ah)
Goobo joogto ah la'aan	50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 1000 qof (500 x 2 kooxood oo joogto ah)	50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 2000 oo qof (500 x 4 kooxood oo joogto ah)

Caweysyada, makhaayadaha iyo qabanqaabooyinka khamriga lagu iibiyo

- Xeerkaa ahaa in khamri-iibintu istaagto saacadda 24:00 waa la joojiyay. (qodob cusub)
- Xeerkaa ahaa in soo geliddu istaagto saacadda 24:00 waa sidiisii.
- Waa in dadka la diiwaangeliyaa, qofka khamri laga gadayo miis haystaa, tirada dadka meesha soo gelaya la dhimo, dadku dhammaan haystaan meel ay fadhiistaan – lana kala fogaan karo.